*Maxaa Xigi doona Qoysaska*

# Broadleigh

Nagula soo biir **Shirarka Bulshada  Dugsiga Hoose ee Broadleigh  Elementary School** si aad su'aalo u weydiiso, ulana wadaagto fikradahaaga, oo aad u hesho xogta aad u baahan tahay ee ku saabsan sida Dugsiyada Magaalada Columbus ay u maalgeliyaan waxbarashada ilmahaaga!

- **Arbacada, 10-ka Seb. 6 p.m., fiidnimo,ee  Dugsiga sare ee East High School, 1500 E. Broad St.**
- **Arbacada, 8-da Okt. 6 p.m., fiidnimo, ee Dugsiga sare ee East High School, 1500 E. Broad St.**
- **Kulamada tooska ah (Virtualka) eeTBD**

## Noofeembar iyo Diseembar 2025

- Warqado adiga laguugu soo dirayo boostada ee **lagugu ogeysiinayo dugsiga cusub ee xaafadda gurigaaga**
  cinwaan ahaan.
- Indho-indheynta qoyska waxaa lagu bixinayaa dugsiga cusu xaafadda gurigaaga.
- Xogta laguu soo diray ee ku saabsan barnaamijka Bakhtiyaa -nasiibka Rabitaanka Xulashada Dugsiga iyo sida uu u shaqeeyo.

## Janaayo 2026

- **Bakhtiyaa-nasiibka Rabitaanka Xulashada Dugsiga wuxuu furmayaa 5-ta-ilaa-30-ka Janaayo** ee loogu talagalay qoysaska raba inay dhigtaan dugsi aan ahayn dugsigii ay ku qornaayeen.

## Febraayo ilaa Abriil 2026

- Fursadaha adiga iyo ilmahaaguba aad heli kartaan dhismaha dugsigaaga cusub, macalimiinta, maamulayaasha, iyo bulshada.

## Maajo iyo Juun 2026

- Qoysaska iyo xubnaha bulshadu waxay heli doonaan fursad ay ku maamuusaan dhismaha Broadleigh, shaqaalaha, iyo bulshada marka ugu dambaysa.

## Agoosto iyo Sebteembar 2026

- Ardaydu waxay sannad-dugsiyeedka ku bilaabayaan dugsigaaga cusub.

Qoysaska waxaa la ogeysiin doonaa ka hor fasaxa qaboobaha/xagaaga waxa ku saabsan meeleynta dugsiga cusub ee xaafadda gurigooda. Waxa la filayaa in uu noqdo mid ka mid ah saddexda dugsi ee soo socda:

**Fairmoor · Eastgate · East Columbus**

*Xogg muhiim ah oo ku saabsan Qoysaska*

# Broadleigh

## Maxaa dhacaya?

Ka dib in ka badan 70 sano oo ay u adeegayeen kumanaan arday ah, **Dugsiga Hoose ee Broadleigh  Elementary waxuu xirmi doonaa dhamaadka sanad-dugsiyeedka 2025-2026.** Waxay daliil u tahay jacaylka iyo daryeelka bulshada in dhismahani uu awood u yeeshay inuu ugu adeego xarun ahaan waxbarasho iyo isku xirka xaafadda ilaa ab ka ab.

Dugsiyada Magaalada Columbus waxaa ka go'an inay ka dhigaan isbeddelka sida ugu fudud ee suurtogalka u-ah ardayda iyo qoysaska, markaasna ma jiri doonaan wax carqalad ah oo ku yimaada socdaalka waxbarashada ilmahaaga. Dhawrka bilood ee soo socda, **waxaanu kula shaqayn doonaa si aanu u hubinno soo dhawaynta diiran ee qoyskaaga mustaqbalka dugsiga.**

## Waa maxay Sababta loo Xirayo Broadleigh?

Ka dib markii la dhagaystay qoysaska oo la hawlgeliyay koox hawleed dadweyne ah si ay u eegaan xaaladda dhismayaasha, kor u kaca kharashka dayactirka, iyo faafitaanka aan sinnayn ee barnaamijyada tacliinta - Guddiga Waxbarashada Magaalada Columbus ayaa u codeeyay in ay ka fariistaan dhowr dugsi oo gabowga ah, oo ay ku jiraan Broadleigh.

Anaga oo ixtiraamayna xusuusta dhismayaashan, goobaha la xiray waa qaali in la dayactiro laguna shaqeeyo. Xiritaannadan waxay u oggolaan doonaan Degmadu inay siiso ardayda barnaamijyo tayo wanaagsan leh, tiknooloojiyadda iyo adeegyadana laga heli karo oo keliya dhismayaasheena cusub ee la cusboonaysiiyay. Marka la xiro dugsiyada gaboobay, waxaanu kor u qaadi doonaa agab-yadeena si aanu u hubino in ardaydu wax ku bartaan xarumaha daboolaya baahiyaha mustaqbalka.

## Maxay Tani Uga dhigan tahay Ilmahaaga?

Laga bilaabo sannad-dugsiyeedka soo socda, ilmahaaga waxa lagu meelayn doonaa dugsi ku yaala xaafadaada iyada oo lagu salaynayo khariirad-xuduudeedka la cusboonaysiiyay. **Waxaan hadda bilaabaynaa hab-socodka si aan u go'aamino fursadaha/xulashada qoysaska deegaankaaga, oo waxaad qayb ka noqon kartaa hab-socodkaas markaad ka qayb-gasho shirarka dadwaynaha ee soo socda.** Waxaan sii wadi doonaa inaan la wadaagno wixii ku soo kordha Mareegta Dib-u-habaynta Dugsiga ee ah: tinyurl.com/SchoolsRealign.